

Xadidyada Toddobaadka Shaqada (Work Week Limit, WWL) iyo Sida Loo Codsado Kordhinta Ku Meel Gaadhka ah

XADIDYADA TODDOBAADKA SHAQADA (WWL)

- WWL waa tirada wadarta ee saacadaha adeega ee Shakhsiga Adeeg-bixiyaha (IP) uu bixin karo toddobaadka shaqada (Axad ilaa Sabti).
- Heerka caadiga ah ee WWL waa afartan (40) saacadood toddobaadkii.
- Haddii aadan haysan WWL joogto ah oo sarreeya, waxaa laga yaabaa inaad shaqaynin wax aan ka badneyn afartan (40) saacadood toddobaadkii haddii aysan ahayn iney ansixiso CDWA ma ahane.

Korodhka ku meel gaadhka ah ee WWL waxa codsan kara adiga, Macmiilkaaga ama Maareeyahaada Kiiska Macmiilka. Codsiyada ku meel gaadhka ah ee WWL waxa loo qiimayn doona xaalad kiisba ka kiis ah mana dhaafi karo laba iyo toban (12) bilood muddo ahaan. Sababaha loo codsado kordhinta WWL waxaa ka mid noqon kara:

• La'aanta helitaanka adeeg-bixiye:

- ♦ Macmiilku waxa uu sameeyay ama ogolaaday in uu sameeyo dadaal daacad ah si uu u aqoonsado oo uu u shaqaaleysiyo IP(yo) dheeraad ah, laakiin Macmiilku waxa uu u baahan yahay wakhti ama ilo dheeraad ah.
- ♦ IP kale oo u shaqeeya Macmiilka ayaa si ku meel gaar ah loo heli karin hadda sabab ah baahi qoys/caafimaadka awgeed oo lasoo deristay.
- ♦ Macmiilku waxa uu si firfircoon u shaqaaleysiinayaa IP kale, laakiin habraacu weli ma dhammaystirna.
- ♦ Macmiilku waxa uu diyaar u yahay in uu isticmaalo dhamaan ilaha/kheyraadka balse ma helin fursad uu ku raadiyo IP-yo badan (Macmiilku waa uu cusub yahay, dib-u-qiimayn ayaa keentay in saacadu kordhaan, IP-ga hadda shaqada ku jira ayaa shaqada isaga tagay, iwm.)
- ♦ Macmiilku waa uu dhameeyay dhammaan ilihii/kheyraadkii uu heystay.

• Caafimaadka iyo badbaadada Macmiilka:

- ♦ IP-gu wuxuu u baahday inuu ku sii jiro wakhti dheer gelin shaqeedkiisa sababtoo ah Macmiilku wuxuu la kulmay xaalad degdeg ah oo aan caadi ahayn, ama IP kale ayaa si lama filaan ah u noqday mid aan la heli karin.
- ♦ Macmiilka ama IP-ga waa in ay ogeysiyaan CDWA maalinta shaqo ee xigta (ama maalinta macquulka ah ee xigta ee suurtoogalka ah) ka dib dhicitaanka xaalada.

SIDA LOO CODSADO KORDHINTA KU MEEL GAADHKA AH EE WWL

Si aad u codsato kordhinta ku meel gaadhka ah ee WWL, wac 866.214.9899 ama iimayl ugu dir InfoCDWA@ConsumerDirectCare.com macluumaadka soo socda:

- Magaca IP-ga
- WWL-ga hadda
- Tirada saacadaha toddobaadlaha ah ee la codsaday
- Magaca Macmiilka(sha)
- Saacadaha uu oggolaaday Macmiilka (codsiyada kama badan karaan saacadaha Macmiilku oggol yahay toddobaadkii)
- Sababta codsashada
- Dhererka codsiga
 - ♦ Taariikhda bilaabida (waa inay noqotaa Axad)
 - ♦ Taariikhda dhamaanshaha (waa inay noqotaa sabti)
- Miyuu Macmiilku raadinayaa IP-yo dheeraad ah?
- Waa maxay tallaabooyinka aad qaatay si aad u sameeyso dadaal daacad ah oo ku aadan si aad meesha uga saarto baahida loo qabo saacadaha dheeraadka ah (ku dar macluumaad gaar ah ee ku saabsan ficillada aad qaaday)?
- Macmiilku ma leeyahay IP-yo kale oo qaadan karo saacado dheeraad ah?
- Ma jirtaa baahi caafimaad iyo mid badbaado oo degdeg ah oo macmiilka heysata? Mise codsiga ku meel gaadhka ah ee WWL waxaa loogu baahan yahay si wax looga qabto baahida badbaadada iyo caafimaadka Macmiilka ee horeyba u dhacday?
- Ma heysaa macluumaad dheeraad ah si aad u taageerto codsiga

CDWA waxay u baahan kartaa macluumaad dheeraad ah si ay u go'aamiso natiijada codsigaaga WWL.